

WARBIXINTA BUKAAN SOCODKA

Ururinta tiradda kaadida ee habeen iyo maalin

Asaaska

Si loo qiyaaso sii deynta qaar ka mid ah dhacaamadda jirka ee kaadida ku jira waa khasab in kaadida la ururiyo ee abuuranta habeen iyo maalin (24- saacaddood).

Isu diyaarinta

Dhaladda baadhidda waxaad ka soo qaadan meesha kuugu dhow ee rugta baadhidda, qaybta sheybaadhidda ama rugta caafimaadka. Haddii aad oggtahay in kaadidda kaa timaadda habeen iyo maalin ay ka badan tahay 2 litir habeenkii iyo maalinti, codso in lagu siiyo labo quraarad. Isticmaal weel si fiican loo nadiifiyey si aad ugu kaadido, maddaama raadka daawoyinka wax lagu dhaqo ay dhibaato u keenayaan baadhitaanka saxa ah. Ka shub markiiba weelka oo quraaradda ku shub mar walba oo aad kaadisid. Weelkana ku dhaq biyo oo keliya.

Kadi uruurinta waa in ay ahaata muddo dhan habeen iyo maalin 24 saacaddood oo sax ah.

Ugu kaadi musqusha si caadi ah subaxa ugu horeeya, kaadidaan laguma uruurinayo quraaradda baadhidda.

Qor saacaddu inta ay tahay:.....

Kaadidda saacaddaa ka dambeysa ilaa iyo maalinta kale isku saacaddaa waa kaadida lagu aruurinayo quraaradda.

Qor saacaddu inta ay tahay:.....

Ku xafid quraaradda baadhidda meel madow oo qabow ah laakiin aan baraf ahayn.

Hubi in magaca iyo tobanka lambar ee caddeynta ay sax ugu qoran yihiin quraarada baadhidda iyo haddii codsi tala ka bixin uu la socdo.

Miyaad awooday in aad ururiso kaadida muddo dhan 24 saacaddood?

Haa

Maya Halkaan ku qor qaabka.....

.....